



UJEDO HESHIIS CADEYN LACAG DEYN AH

Maanta oo ay taariikhdu tahay **09/09/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed Ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Labada Daraf hoos ku Xusan:-

DARAFKA 1AAD: MOHAMED BASHIR MOHAMED (AHNA GUDOOMIYAH FUTURE MEDICAL SUPPLIES LTD)

DARAFKA 2AAD: MOHAMED ABDI ARJE (AHNA GUDOOMIYHA SAFE EXPRESS)

B) Anigo Ah MOHAMED BASHIR MOHAMED (AHNA GUDOOMIYAH FUTURE MEDICAL SUPPLIES LTD), Somali ah Hooyadeyna La Yiraahdo Waliya Khalif Ese, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii, 1990, Sita Passport Somali Lr: P01129622, Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa Anigoo Maskaxdda Iyo Jirkaba Ka Fiyow in ay nagu Lee Yihiin SAFE EXPRESS, kana Masuul ah MOHAMED ABDI ARJE, Lacag Dhan **\$17,744(Todobo iyo Toban Kun Todobo Boqol Afartan iyo Afar Oo Dollarka Maraykanka ah)**, lacagtaas oo ah Deyn Hore Oo aan Ugu Qaadanaa Alaab Cargo Sanad Ka Hor, Waxaana Lacagtaas Ku Bixinaya Mudo Shan Bil Oo Ka Bilaabanaysa Tariikhada Manta **Tr:-09/09/2025**, Kuna Eg **09/01/2026**, Waxaa Mar Labaad Cadeynayaa in aan Ku Bixin Doono Mudada aan Qabsaday Lacagtaas Sare Ku Xusan Anigo ah Gudoomiyaha **FUTURE MEDICAL SUPPLIES LTD**, Sida Ku Cad Warqada Xeerka Shirkadda Ref:-2533/2021, Tr:-05/07/2021, Kana Soo Baxday Notaayo Azhari, uuna Saxiixay Dr Muxudiin Xasan Maxamed.

T- Anigo ah Mohamed Abdi Arje, Somali ah, ina Nuro Ahmed Kulane, Ku Dhashay Tana River, Sanadkii 1991, Sita Kenyan Passport Lr:-CK50848, Ahna Gudoomiyaha SAFE EXPRESS, Sida Ku Cad Warqada Xeerka Shirkadda Ref:-XNT/2489/25, Tr:-01/04/2025, Kana Soo Baxday Nootaayo Talo-Wadaag, uuna Saxiixay Dr, Sh, Axmed Cali Cismaan, Waxaan Caddeynaya in aan Ku Lee Yahay Lacag Deyn **FUTURE MEDICAL SUPPLIES LTD** Oo uu Gudoomiye Ka Yahay MOHAMED BASHIR MOHAMED, Lacagtaas Oo Dhan **\$17,744(Todobo iyo Toban Kun Todobo Boqol Afartan iyo Afar Oo Dollarka Maraykanka ah)**, Aan Ku Heshiinay uu Ku Bixinayo Mudo Shan Bilood ah Oo Ka Bilaabanayso Traiikhda Manta **Tr:-09/09/2025**, Kuna Eg **09/01/2026**, Waxaa Ugu Danbeyntii Caddeynaya in aan Ku Qancay Caddeyntaan Raalina aan Ku ahay.

SAXIIXA CADEEYAHA

MOHAMED BASHIR MOHAMED





SAXIIXA LOO CADEEYAHA

MOHAMED ABDI ARJE



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-C/CASIIS XASAN MAXAMED (Tel:-0615439936) 2-MAXAMUUD CABDISAMAD AXMED (Tel:-0615439936)



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.1809/T.P.N/25, Tr. **09/09/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- MOHAMED BASHIR MOHAMED Ahna (Cadeyaha), 2 MOHAMED ABDI ARJE Ahna (Loo Cadeeyaha), iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Sid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Heshiiskan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"



MAASAWIRKA CADEEYAHA

MOHAMED BASHIR MOHAMED



MASAWIRKA LOO CADEEYAHA

MOHAMED ABDI ARJE



MASAWIRKA MARKA HATIIYAASHA

1-C/CASIIS XASAN MAXAMED



2-MAXAMUUD CABDISAMAD AXMED



Xafiiska Nootaayaha
iyo la talinta
arrimaha sharciga ee
Azhari



JAMHUURIYADDA
FEDERAALIGA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA EE
AZHARI



مكتب أزهرى
للإستشارات القانونية
وتوثيق العقود

REF:-2533/2021 UJEEDDO: - CADEYN LAHANSHO SHIRKADA FUTURE DATE:-05/07/2021

MEDICAL SUPPLIES (LTD)

Maanta oo ay taariikhdu tahay 05/07/2021, anigoo ah **Dr. Muxudiin Xasan Maxamed** oo Xafiis Nootaayo ku leh D/yaqshiid, waxaa horteyda yimid ayagoo heshiis ah dadka kala ah:-

1-Maxamed Bashiir Maxamed ina Waliyo Shariif Ciise ku dhashay Muqdisho 01/Feb/1990-kii Somali ah degan Deg, Wartanabada lehna National ID:No-P00358195 (**CODSADE**),

2-Maxamuud Cabdisamad Axmed Ina Xabiibo Maxamed Cabdi ku dhashay B/Weyne 10/Jan/1982-kii Somali ah degan Deg, Yaaqshiid lehna National ID No-28201104010049/Som (**CODSADE**),

Codsadayaasha kor ku qoran waxey Nootadaya ka Codsadeed in ay u qorto Heshiis wadalahancho SHIRKADA FUTURE MEDICAL SUPPLIES (LTD) Shirkaadaas oo Shaqadeedu tahay Soo dajinta qalabka Caafimaadka Heshiiskooduna waa sida hoos ku qoran:-

Qodobka 1-aad
Waxay isku darsadeen

1-Maxamed Bashiir Maxamed	US\$175,000
2-Maxamuud Cabdisamad Axmed	US\$175,000
Wadarta	US\$350,000

Qodobka 2-aad

Shirkada **Future Medical Supplies LTD** Waxaa la Aas`Aasay 24/Jan/2020

Qodobka 3-aad

Saahmileydu Shirkada waa u siman yihiin Faa`iidada iyo Khasaaraha Shirkada



Qodobka 4-aad

Shirkadaas Xarunteeda Waxay ku taalaa Dagmaada Howlwadaag Gaar Ahaan Suuqa-Bakaaraha.

Qodobka 5-aad

Shirkada **Future Medical Supplies LTD** Waxaa Gudoomiye ka ah **Maxamed Bashiir Maxamed**.

Codsadayaasha Kor ku xusan waxay Nootaayada Ka codsatay in ay keenaan Markhaatiyaal Xog ogaal u ah lahanshaha **SHIRKADA FUTURE MEDICAL SUPPLIES (LTD)** Waxaana Marag Ahaan u yimid Nootaayada Dadka kala ah:-

1-C/kariin **axmed Hiloowle** Ina Salaado Cilmi Cadoow ku dhashay Muqdisho 26/Jun/1975-kii Dagan Deg, Yaaqshiid Lehna Kaarka Aqoonsiga Dowlada Hoose Ee Muqdisho No-14429 Kaas oo ku dhagan Aatadan,(MARAG).

2-Jamaal C/kariin **Xasan** Ina Xaliimo Carab Xersi ku dhashay Muqdisho 15/Fab/1992-kii Dagan Deg, Hodan Lehna Passport No-P00977972/Som Kaas oo ku dhagan Aatadan,(MARAG).

Markhaatiyaasha Kor ku xusan Waxay Nootaayada Ka hor Cadeeyeen in **SHIRKADA FUTURE MEDICAL SUPPLIES** ay Wada Leeyihiin 1-**Maxamed Bashiir Maxamed** 2-**Maxamuud Cabdisamad Axmed** Isla Markaasna Aysan Jiran Cid kale oo Horay U laheed Shirkadaas.

CODSADE: - **Maxamed Bashiir Maxamed**

CODSADE: -**Maxamuud Cabdisamad Axmed**

Marag, C/kariin **axmed Hiloowle**

Marag, **Jamaal C/kariin Xasan**

XAFIISKA NOOTAAYADA EE AZHARI

Nootaayada **Dr.Muxudiin Xasan Maxamed** ee D/yaqshid waxay sugeysaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii saxda ahaa, laguna Saxiixay Nootaayada horteeda, waana **Cadeyn Lahaansho Shirkada Future Medical Supplies (LTD)** ansax ah oo waafaqsan Shareecada Islamka & qaynunka dalka, waxana lagu qoray diiwanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYO

Dr.Muxudiin Xasan Maxamed





Ref No: XNT/2489/25

TR: 01/04/2025

UJEEEDO: XEERKA SHIRKADDA SAFE EXPRESS

Maanta oo ay taariikhdu tahay 01/04/2025, Waxaa Xafiiska Nootaayada Talo-Wadaag ee Dr. Sh Axmad Cali Cismaan ay u qortay aasaasayaasha hoos ku xusan Cadaynta shirkadda magaceedu yahay **Safe Express**, Waxaana loogu qoray Sidaan:

No	Magaca	Title	Goobta Dhalashada	Sanadka	Passport No:
1	Mohamed Abdi Arje	Guddoomiye	Muqdisho	1991	P00383445
2	Ahmed Mohamed nor	G/Kuxigeen	Muqdisho	1980	P00640695
3	Nawal Nor Ibrahim	Xubin	Muqdishu	2018	P01662252

Qodobka 1-aad: Ujeedada Shirkadda

Ujeedka Shirkadda Safe Express, waa caawinta dhamaan macamiisha kana dhigtaa ganacsiga mid wanaagsan, sidoo kale Shirkadda Waxay qabanaysaa adeegyada soo socda Custom Clearance, freight forwarding, inland transportaion, air/sea freight iyo in lagu soo adeego ama aad ka dalban karto si toos ah online website ka sida Somshoppers.com oo aan macamiisha usameynay

Shirkada Safe Express Waa shirkadd ka mid ah shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka howlgala Magaalada Muqdisho.

Qodobka2-aad: Himilada Dhow Iyo Kuwa Fog

Ujeedka shirkadda waa inay noqoto shirkadda kiliya oo la isku halayn karo ugana qiima jaban xaga adeega dhamaan bariga africa taas oo bixinayso adeegyada kala ah

1. Gudbinta xamuulka
2. Qeybaha gadiidka iyo saadka ayadoo ku qabanayso khibrad dhamaystiran iyo waqti gaaban oo tayo ficanleh
3. Ka shaqaynta cirka, badda iyo dhulka, tasoo ku dhisan daacadnimo iyo qanacaad macaamiil.

Qodobka 3aad: Xiliga Shirkadda La'aas-aasay

Shirkadda ganacsiga ee **Safe Express**, Waxaa la aas' aasay taariikhdu markay ahayd 01 December 2021 , waxaana lagu aas'aasay magaalada Muqdisho soomaaliya.



Qodobka 4-aad: Hantida Shirkadda

Ra'sumaalka shirkadda wuxuu noogu qiimaysanyahay \$500,000USD, shan Boqol Kun oo doolar marykanka ah,

Capital Structure

No	Name	Tirada saamiga	Qiimaha saamiga	Percentage %
1	Nawal Nor Ibrahim	1	\$166,666.66	33.4%
2	Ahmed Mohamed Nor	1	\$166,666.66	33.3%
3	Mohamed Abdi Arje	1	\$166,666.66	33.3%
TOTAL		3	\$500,000	100%

Qodobka 4-aad: Astaanta Guud ee Shirkadda

Astaanta guud ee shirkadda waxay noqonaysaa mid ka turjumaysa magaca shirkadda waxaana loo isticmaalayaa wax kasta oo shirkaddu leedahay, wixii aan loo isticmaalin astaantaas ma noqonayaan kuwo shirkadda si toos ah ugu turjumaya.



Qodobka 5-aad: Saldhigga Shirkadda

Shirkadda gacansiga ee **Safe Express**, xarunteeda ugu wayn waxay ku leedahay Muqdisho-Somalia, sidoo kale waxay xarumo kuleedahay dhamaan gobolada dalka Soomaaliya, Waxaana lagala soo xiriiri karaa email: Info@safecargo.biz, <http://Safecargo.biz/>, Tel No: 0619995822

Qodobka 6aad

Xaquuqda xubnaha saamileeyda ah.

Saamilke kasta waxuu xaq u leeyahay:-

1. In uu helo warbixin ku saabsan hawlaha shirkadda sanadkiibahal mar.
2. In loosheego faa'iido iyo khasaaro waxii soogaaro sanadkiiba.
3. In loo sheego marka la'iibinayo ama la kordhinaayo samiyada shirkadda.
4. Waa inuu helaa cadaayn ama shahaado ama cadaayn mujinaysa saamiyda uu ku leeyhay shirkadda iyo qiimahooda.
5. Waxuu ka qadan karaa shirkadda ama kala bixi karaa saamigiisa marka la sameeya Xisaab xirka sannadka.



Qodobka 7aad

Gadashada saamiga

Saamile kasta waxaa u xaq u leeyahy in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa maamulka shirkadda ayadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmooda ah, wuxuu u madax banaanyahay in uu ka gato cidduu rabo.

Qodobka 8aad

Qaybsashada faa'idada iyo khasaaraha

Faa'idada iyo khasaaraha shirkadda waxaa loo qaybsanyaa sida hoos ku cad: -

1. Waxay ku xadidantahay qof walba inta saami uu leeyahay waxaana la qaybinayaa markuu dhamaado xisaab xir sanadeedda saddex bilood ka dib.
2. Faa'idada la helay haddi ay tahay 5%, waxaa lagu biirinayaa hantidashirkadda mana la qaybinayo haddi aysan go'aan ku gaarin gudiga maamulka (Board of Directories)
3. Haddi ay jirto baahi isblaarin ee shirkada faa'idada waxaa go'aaminayo guddiga saamileyda in lagu kordhiyo iyo in laqaybiyo
4. Haddii uu ku yimaado khasaaro, dhinacyada saamileyda ah waxuu bixinayaa saamile kasta qaybta saamigiisa kaga soo aado hantida uu shirkadda ku leeyahay.
5. Faa'iiddo sanadeedka inta aan laqaybin waxaa laga goynayaa gunnada abaal gudka ah oo aan kayarayn 20%, waxaana lasiinayaa gudiga maamulka, shaqaalaha iyo ciddi shaqo wanagsan u qabta shirkadda.
6. Sakada waxaa laga bixinyaa faa'idada iyo raasulmaalka shirkadda marka laisku daro, lagana bixiyo dhammaan, kharashaadka iyo daymaha shirkadda waxaa bixinaya guddiga maamulka.
7. Saamile kasta waa in lasiiyo faa'iidadiisa loona sheego meesha uu ka qadaanayo iyo waqtiga lasiinyo.

Qodobka 9aad

Shakhsiyadda Qaanuuniga ee Shirkadda

Shirkadda waxay leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhamaan hantida shirkadda sida: gaadiidka, qalabka, dhulalka, guryaha, sumadaha ganacsiga iyo tiimbarayaasha.

Qodobka 10aad

Qaabdhismeedka iyo maamulka shirkada

Maamulka shirkadda wuxuu ka kooban yahay sidaan hoos ku qoran:-

1. Gole guud (General Assembly)
2. Guddiga maamulka (Board of directors)
3. Gudomiyah shirkadda
4. Gudiga fulinta shirkadda.
5. Guddigga hanti- dhawrka.



Qodabka 11aad

Golaha guud ee shirkadda

Golaha guud ee shirkadda waa hay'adda ugu sareeyso shirkadda, waxayna ka koobanyihiin dhammaan saamileyda shirkadda xilalka iyo awoodaha golaha guud waa sidaan hoos ku xusan:-

1. Ansixinta miisaaniyadda.
2. Ansixinta qorsha sanadeedka
3. Ansixinta dastuurka, xeerka iyo wax ka bedelkooda
4. Ansixinta xubnaha cusub ee shirkadda

Qodobka 12aad

Guddiga Maamulka (Board of Directors)

Guddiga maamulka shirkadda waa hay'dda ugu sareeyso maamulka, lehna awooda fulinta ee shirkadda waxayna ka koobanyihiin 3 xubnood, awoodaha iyo xilalka gudiga maamulka waa sidaan hoos ku xusan.

1. Dejinta qorshaha iyo siyaasadda guud ee shirkadda.
2. Ansixida iyo wax kabadelka miisaaniyadda.
3. Ka doodida iyo meel marinta heshiyada ay dhinac ka tahay shirkadda.
4. Magacaabidda guddiga fulinta ee shirkadda.
5. Magacaabidda guddiga hanti-dhowrka ee shirkadda.
6. in ay kordhiyaan raasumaalka shirkadda soona saaraan saami cusub.

Qodobka 13aad

Waa jibaadka Guddoomiyaha Shirkadda.

Waa jibaadka guddoomiyaha shirkadda (Chairperson)

1. In uu saamileyda iskugu wacaan kulamada guddiga maamulka
2. In uu shir guddoomiyo shirarka guddiga maamulka
3. In uu shirkadda ka matalo hay'adaha dawladda
4. In uu yeesho kormeeridda iyo habsami u socodka hawlaha shirkadda
5. In uu yeesho hubinta go'aanada guddiga maamulka.
6. Inuu maamulikaro Account Shirkadda, sida inuu u furi karo, inuu lacag uga bixin karo, iwm.

Qodobka 14aad

Guddiga Fulinta ee shirkadda (Executive Board)

Guddiga fulinta ee shirkadda waa madaxa hawl wadeenada shirkadda kuwaasoo ka kooban agaasimayaasha, waaxaha, madaxada qeybaha iyo shaqaalaha shirkadda.

- A. Shaqaalaha waxaa lagu xulanayaa aqoon khibrad iyo waayo argnimo shaqo
- B. Guddoomiyaha guddiga fulinta waa inuu dabaqaa fuliyaana go'aanada guddiga maamulka
- C. Waa jibaadka iyo mas'uuliyadda maareeyaha hawl fulinta (Executive Director) waa sidaan hoos ku xusan.
 - 1- Fulinta qorshaha siyaasad ay dajiyeen guddiga maamulka.
 - 2- La xisaabtanka shaqaalaha shirkadda



- 3- Diyaarinta warbixinta shirkadda bil kasta
- 4- Fulinta hawlmaalmeedka shirkadda
- 5- Diyaarinta xisaabaadka iyo howlaha la xiriir maaliyadda
- 6- Inuu xaqiijiyo habsami u socodka shaqooyinka iyo qorsho howledyada.
- 7- Inuu dajiyo dhaqaalaha lagu maamulayo shaqaalaha shirkadda.
- 8- In shaqaalaha qofkii dhaqan xumo la yimaado u gudbiyo guddiga anshaxmarinta ee shirkadda.

Qodobka 15aad

Guddiga hanti-dhowrka

Guddiga hanti dhowrka wuxuu mas'uul ka yahay hantida shirkada oo kala ah guurto iyo ma guurto,

1. Guddiga hanti-dhowrka wuxuu ka koobanayahay saddax xubnood oo joogta ah, Guddiga hanta- dhowrka waxaa soo magacaabayo gudiga Maamulka (Board of Director).
2. Waa jibaadka iyo awooda guddiga hanti dhowrka waxaa lagu caddeynayaa xeer gaar ah.
3. Guddiga hanti dhowrka wuxuu xilka haynayaa muddo Saddax Sano ah waana loo cusbooneysiin karaa.
4. guddiga hanti dhowrka ayaa iska dhex dooranaya guddoomiyaha, wixii warbixin ah waxay u gudbinayaan guddoomiyaha shirkadda,

Qodobka 16aad

Kooramka shirarka

1. Shirka golaha guud ee shirkadda kooramka ugu yaree la isugu yeeri karo waa 1/3 shirka marka arrimaha laga hadlayo yihiin kuwa caadi ah.
2. Marka laga hadlayo arrimo muhiim ah sida: -Ansixta xeerka iyo sharciga dhismaha shirkadda miisaaniyada wuxuu kooramka noqonayaa 2/3 Saddex meelood laba meel xubnaha golaha guud.
3. Shirka guddiga maamulka (Board of Director) kooramka uu ku ansaxayo ee ugu yaraan waa 1/3.

Qodobka 17aad

Go'aan Gaaridda

Go'aan gaarida guddiga maamulka wuxuu ku ansaxayaa 2/3 marka wax laga beddelayo dastuurka, xeerka iyo hantida shirkada, inta kale go'aanka waxa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah.

Qodobka 18aad

Miisaaniyadda iyo Xisaab xirka shirkadda

Shirkaddu waxay yeelanaysaa labo xisaab- xir, xisaab xirka koowaad waxuu dhacayaa 1 - 30 June, waana kontroolka gudaha oo loo soo bandhigayo guddiga maamulka, xisaab - xirka labaad waxuu dhacayaa 31 December isla Sanadkaas, waana xisaab- xirka rasmiga ah ee shirkadda.



Qodobka 19aad
Ka bixidda shirkadda

1. Saamila kasta waxaa ka reeban inuu saamigisa kala baxo shirkadda sanad xisaabeedka koowaad ee ku xiga dhismaha shirkadda.
2. Saamila kasta ee raba inuu ka baxo shirkadda, waa inuu qoraal ku soo codsadaa la bixidda saamigiisa ugu yaraan saddax bilood ka hor xisaab xir sanadeedka.
3. Guddiga maamulka ah waa inuu go'aan ka gaara qaabka loo bixinayo iyo sida loo buuxinayo booska banaanaday.
4. Haddii saamiyada lala baxayo ay ka badanyihiin 25% hantida shirkadda waa in guddiga maamulka go'aan ka gaaro sida loo kaabay ama wax looga bedelayo raasumaalka shirkadda.
5. Haddii ay maxkamad saarto xayirad hantida saamile ka mid ah shirkadda, maamulka waa inu go'aan ka gaaraan ka sii mid noqoshada shirkadda.

Qodobka 20aad
Geeri ama waali ku timid xubin ka mid ah saamileyda

1. Qofkii geeriyoda ee ka mid ah xubnaha saamileyda waxa yeelanaya saamigiisa dhaxaltoodiisa, waxaase shardi ah inuu guddiga maamulka ah oggolaadaan xubnimadiisa shirkadda.
2. Haddii wali ku timaado xubin ka mid ah shirkadda waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

Qodobka 21aad
Baabi'inta shirkadda

Waxay baaba'aysaa shirkaddu marka la helo qodobada soo socdo: -

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka shirkadda.
2. go'aan baabi'in ee ka soo baxay guddiga maamulka.
3. Haddii shirkaddu ay musalafto.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabinayo shirkadaha noocan ah.

Qodobka 22aad
Kala qaybsiga hantida shirkadda

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida shirkadda ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay shirkadda iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay shirkadda.

Qodobka 23aad
Sharciga iyo Luqada heshiiska

1. Luqadaha heshiiska oo ku qoranyahay waxaa asal u ah luqadda Soomaliga
2. Marjaca loo noqonayo waa dastuurka shirkadda iyo qawaaniinta dalka u degsan ee mowducaas nidaaminaya.
3. Wixii fasiraad ah waxaa lala kaashanayaa dadka xirfadoodu tahay howshaan



4. Nuqulka Af-soomaliga oo ay saxiixeen xubnaha guddiga maamulka oo dhan waxa lagu keydinayaa xafiiska xarunta shirkadda iyo goobahii uu tilmaamay xeerka shirkadda Soomaaliyeed.

Qodobka 24aad

Wixii laga waayo sharciga dhismaha Shirkadda.

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha shirkadda waxaa loo racayaa xeerka shirkadda iyo sharciga shirkadaha ee dalka u degsan.

Qodobka 25aad

Dhaqan galka sharciga dhismaha

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangelayaa marka ay saxiixaan milkiilayaasha shirkadda, laguna diiwaangeliyo diiwaanka shirkadaha ee yaalo maxkamada gobolka.




Qodobka 26aad

Tiradda Bogagga oo heshiiska ku qoranyahay

Heshiiskan wuxuu ku qoranyahay Af-Soomaali wuxuuna ka koobanyahay Todobo (7) bog.

Heshiiskan waxaa ila saxiixay milkiilayaasha Shirkadda, kadib markii ay akhristeen, raalina ay ka noqdeen sida aan u qornay heshiiskan, waana kan saxiixyadooda hoos ku qoran: -

Sidaas Darteed Markaan Aragnay dhamaan Caddaymaha shirkadda Nootaayada Talo-wadaag Waxay Caddaynaysaa in ay tahay (shirkadda) mid sharci ah.

No	Name	Title	Signature
1	Mohamed Abdi Arje	Guddoomiye	
2	Ahmed Mohamed nor	G/Kuxigeen	
3	Nawal Nor Ibrahim	Xubin	

FG : Xeerkaan waxaa lagu baa bi'iyay Xeerkaa hore ee taariikhdiisu ahaa, Tr : 30/1/2022. Kuna saxiixan yahay Dr. Sh Axmed Cali Cismaan, Waxaana shaqeynaayo xeerkaan danbe wixii ka dambeeyo taariikhda heshiiskan.

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Anigoo ah Nootaayada Talo-Wadaag Dr. Sh. Axmed Cali Cismaan, waxaan sugayaa magaca iyo saxiixa kor ku xusan in uu yahay saxiixa dhabta ahaa ee aas'aasayaasha Shirkadda Safe Express, Waxaana laga saxiixay ayagoo raali ah, caafimaad qaba xiskooduna Taam yahay, cid qasabtayna aysan jirin kadib markii loo akhriyey qoraalka caddaynta shirkadda, waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee Nootaayada.

Dr. Sh. Axmed Cali Cismaan






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 11/09/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **MAXAMED CABDI ARJI** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **SAFE EXPRESS** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1809/T.P.N/25, Tr. 09/09/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	SAFE EXPRESS
Taariikhda Caddeynta	09/09/2025

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **MAXAMED CABDI ARJI**, Leh Tel No. **61 3782444**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **SAFE EXPRESS**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

MAXAMED CABDI ARJI